

Video 1

Waa maxay PBLA

| | |
|---------|--|
| Muuqaal | Ka-sheekeyn |
| 1 | Ku soo dhawow Kanada iyo luqadda fasalkaaga Ingiriisiga! Markii aad halkan waqtii ku qaadato, waxaad baran doontaa Ingiriisi iyo waxa ay ka dhigantahay ku noolaashaha Kanada. |
| 2 | Fasalkaaga dhexdiisa, barahaagu wuxuu adeegsanayaa Xidhmo Qiimayn oo Luuqad-ku-saleysan, ama PBLA, si laguu tuso sida luqaddaadu u fiicnaaneyso. |
| 3 | Waqtii kadibayaad baran doontaa Ingiriisiga, adoo ka sii fiicnaanaya sida ugu badan ee aad wax uga barato macalinkaaga iyo in badan oo aad tababarato. |
| 4 | Waxaad u baahantahay inaad muujiso wixii aad baratay. Si lagaaga caawiyo inaad taas samayso, waxaad heli doontaa xidhmo aad adigu iska leedahay. Macallinkaaga ayaa ugu yeedhi kara feylkaaga. |
| 5 | Kani waa feylkaagii aad u adeegsan doonto fasalkaaga ESL. Waa kugu arki fasalka! |

Video 2

Goorma ayaad isticmaashaa PBLA

| | |
|---------|---|
| Muuqaal | Ka-sheekeyn |
| 1 | Fasalkaaga dhexdiisa, waxaad ku tababaran doontaa Dhageysiga, Hadalka, Akhriska, iyo Qoraalka. Tani waxay gacan ka geysan doontaa hagaajinta Ingiriisigaaga. |
| 2 | Waxaad ku ridi doontaan wixii aad baratay feylkaaga. |
| 3 | Waqtii kadib waxaad arki doontaa sida Ingiriisigaaga usoo fiicnaanayo. |
| 4 | Waxaad awoodi doontaa inaad dib u eegto wixii aad soo baratay oo aad la shaqeyn kartu macalinkaaga si uu u go'aansado waxaad u baahan tahay inaad horumariso iyo waxa ku xiga ee aad baraneyso. |
| 5 | Feylkaagu waxa kale uu leeyahay macluumaad badan oo muhiim ah oo ku saabsan ku noolaanshaha Kanada iyo barashada Ingiriisiga. |
| 6 | Feylkan adigaa iska leh inaad ku isticmaasho fasalka dhexdiisa iyo guriga. |

Video 3

Maxaa loo isticmaalayaa PBLA

| | |
|---------|--|
| Muuqaal | Ka-sheekeyn |
| 1 | Fasalkaaga dhexdiisa, barahaagu wuxuu ku weydiin doonaa waxaad rabto inaad barato. Waxaad dooran kartaa mowduucyo kaa caawin doona nolol maalmeedkaaga Kanada. |
| 2 | Waqtii kadib waxaad arki doontaan sida Ingiriisigaaga usii fiicnaanayaan. |
| 3 | Marka Ingiriisigaaga sii wanaagsanaadaan, waxaad awoodi doontaan inaad waxyaabo badan oo kale sameyso oo ku saabsan nolol maalmeedkaaga sida aadidda waxsoo gadasho. |
| 4 | Ka fakir iyada, waxa barashada Ingiriisigaaga ay kaa caawinayaan wixii aad ka sameyneyso noloshaada? |
| 5 | Xagga feylkaaga waxaad ka arki kartaa ilaa meesha aad gaadhay. |

Fiidiyoowga 4

Markhaatiyaallada Ingiriisiga

Ka-qeybgalayaasha fiidiowyadan ayaa baranaya Ingiriisiga. Qeybo ka mid ah qoraalka ayaa la saxay si loo caddeeyo.

Ka-sheekeyn

Adeegsiga PBLA ee fasalkaaga waxay kaa caawin doontaa inaad Ingiriisiga barato. Bal aan maqalno waxa ay ardaydu leeyihii!

Su'aasha la sheegay: Goormaad isticmaashaa feylkaaga?

Waxaan isticmaalaa feylkayga maalin kasta.

Markaan u baahdo inaan wax ka barto Kanada.

[Xagga] guriga, inaan dib u eego shaqadayda oo dhan.

Haddaan u baahdo caawimaad xagga fasalkeyga

Markaan rabo inaan arko horumarkayga koorsada.

Maalin kasta maxaa yeelay waa saaxiibkayga nolosha.

Su'aasha la sheegay: Maxaad Ku riddaa feylkaaga gudihiisa?

Feylkayga waxaan geliyay shaqooyinkayga iyo shaqada guriga.

Hadalkayga, dhageysigayga iyo howlaha akhriskeyga.

Imtixaanadayda iyo qoraaladayda.

Faylkayga

Su'aasha la sheegay: Sidee ayuu adeegsiga feylku kuu caawiyaa?

Feylku wuxuu iga caawiyaa inaan barto Ingiriisiga.

[Si] aa wax uga barto Kanada.

Si aan wax uga barto bulshadeyda cusub.

Su'aasha la sheegay: Maxaad u rabtaa adeegsiga feylka?

Waxaan jecelahay inaan isticmaalo feylkayga sababtoo ah waxay iga caawisaa abaabulka agabkayga.

Waxaa ku jira macluumaad muhiim ah, waxtar leh, oo cusub.

Waxay leedahay macluumaad aad u faa'iido badan oo ku saabsan Kanada sida cimilada iyo hawada, guriyeenta, waxbarashada, nidaamka caafimaadka.

Feylku waa sida hagaha xagga safarkayga luqadda Ingiriiska.

Feylkaygu wuxuu iga caawiyaa inaan arko sida Ingiriisigeygu u fiicnaanayo.

Waxay ka caawineysaa dadka cusub inay helaan fikrad guud oo ku saabsan sida ay ku bilaabi karaan nolol horle iyo nolol cusub.

Feylkaygu wuxuu iga caawiyay inaan nolol cusub ka bilaabo Kanada.

Adeegsiga PBLA ayaa caawisay ardaydan. Kaalay arag sida ay kuu caawin doonto!

Waxaan kugu arki fasalka!